


# Warsidaha

## Somaliland Biodiversity Foundation

www.somalilandbiodiversity.org I February 2021 I Tirsiga 8aad

**Tusmada Warsidaha**

Karaamayntii Axmed Cawaale ................1
Noolaha Maanta.......................................1
Dikhawga Balaastikada ee Somaalilaan..2
Saylac iyo Tokhoshi.................................3
Dib-u-habayntii Degelka Ururka.............4
Hawl qabadyadii ugu mudnaa ee 2020.....................................................5-10

## Noolaha Maanta


**Avicennia marina *('Takhay')***



Takhaygu "Avicennia marina" waa jaad ka mid ah dhirta xeelliga oo si aad ah uga baxa jasiiradda Sacaadaddiin. Waa geed-gaab xilli walba cagaaran, oo inta badan 1 illaa 10 mitir ah, oo ka baxa xeelliga mawjaduhu soo gaadhaan. Waa geed degdeg u kora oo dhaqso u tarma.

Wuxu leeyahay faa'idooyin deegaan iyo kuwo dhaqaale. Wuxu dhimaa xawliga mawjadaha xeelliga, wuxu khatarta daadadka ka yareeyaa xeebaha waxa kale oo uu hoy u noqdaa nooleyaal badan oo kuwa biyaha ku nool ah. Geedkan waxa kale oo laga helaa xaabo fiican, xoolaha geela iyo riyaha ahina laac bay ka helaan.

# Karaamayntii Axmed Ibraahim Cawaale



Axmed Cawaale

Reer Soomaalilaan way ku barteen Axmed I. Cawaale in uu yahay deegaan-jire, bare, qoraa iyo ka shaqeeye arrimaha baniaadamnimada. Markaa la yaab kuma ay noqon in ay arkeen isaga oo la karaameeyey, in kasta oo laga yaabo in ay la yaabeen qaabka loo sharfay: Dib-qallooc baa loogu magac daray.

Marka ay saynisyahannadu u magac bixinayaan jaad noole ah, magacu waxa uu ka koobmaa laba weedhood, ka hore oo noolaha ku xidha qaraabadiisa, iyo ka labaad oo magaca noolaha ka dhiga mid jaadkaas uun gooni u ah. $31^{KII}$ Oktoobar 2020, František Ko-vařík iyo kooxdiisu waxa ay ku magacaabeen dibqallooc ay Soomaalilaan ka heleen ***Pandinurus awalei*,** 'awalei' oo ah qoraalka laatiiniga ah ee "Awale".

Axmed si weyn buu ugu hanweyn yahay in lagu sharfay magaca uu xanbaarsan yahay *Pandurinus awalei.*

Waxa muhiim ah in hoosta laga xarriiqo baahida loo qabo sidii dad badan oo reer Soomaalilaan ah loogu soo dabbaali lahaa barashada kala duwanaanshaha noolaha Soomaalilaan. Isaga oo baahidaas ka jawaabaya Axmed wuxu casharro ka bixiyaa Jaamacadda Hargeysa, sidoo kale madalo kala duwan ayuu hadallo ka jeediyaa, waxna ku qoraa. Aqoontiisa, fahankiisa iyo u hagar bixiisa deegaanka Soomaalilaan waxa ay ka muuqdaan dhammaan waxqabaddadiisa.



*Pandurinus awalei* Sawirka : F. Kovařík

**Eeg Bogga 5aad**

# Dikhawga Balaastikada ee Soomaalilaand

Farxiya Axmed Ibraahim

Badda iyo xeebaha Soomaalilaan waxa ay wajahayaan khataro deegaan oo la mid ah kuwa dunida kaleba ay wajahayaan oo ah dikhawga walxaha balaastiga ah, saliidaha, deegaan geddiska, dikhawga huubada, nabaad-guurka iyo kalluumaysiga xad-dhaafka ah ee sharci darrada u badan. Dhibaatooyinkaas tan ugu korodhka badan waa dikhawga balaastiga. Haddeer, ugu yaraan 8 bilyan oo kg oo balaastig ah ayaa badaha u gudba sannad kasta. Haddii ay sidaa ku socoto, marka la gaadho 2050, balaastigga badaha ayaa ka badan doona kalluunka badda.

Inta badan balaastiggaasi waxa ugu badan ee ay ka yimaaddaan, bad iyo berriba, waa cunnooyinka iyo cabitaannada fudud. Waxa kale oo ku jira galalka nacnaca iyo jajabka, weelka cabitaannada fudud, furarka quraaradaha, bacaha wax lagu rito, tuunbooyinka cabitaannada, iyo cinjirrada la iskugu qabto quraaradaha. In badan oo kuwan ka mid ah dib waa loo warshadayn karaa, laakiin hawlgalkaasi waxa uu qaadan karaa 500-1000 sanno iyo wax ka badan. Mararka qaar dhibka waxa keena walaxda oo u kala daadata ruqubbo aad u yaryar oo aan la arki karin.
Joonyadaha balaastiga ahi (ha yaraadaan ama ha weynaadaane) waa nooca ugu khatarsan ee dila xaya-



Farxiya oo soo bandhigeysaa walxo balaastiga ah oo laga soo saaray mindhicirka kalluunka

waannada badda waayo way liqayaan. Diinka ayaa ku qalda cuntada uu jecel yahay ee kalluunka nooca jellyfish, laakiin inta badan noolayaasha kale waxa ay u liqaan si aan ku talo gal ahayn. Ma aha wax caafimaadkooda u fiican.
Xaggee bay caagaggaasi ka yimaaddaan? Intooda badan waxa ay ka yimaaddaan berriga, gaar ahaan magaalooyinka. Caagagga laga helo xeebaha iyo badda Soomaalilaan intooda badan waxa ay ka yimaaddeen Hargeysa, caasimadda Soomaalilaan.



Dikhawga walxaha balaastigu ku hayaan xeebta Berbera

Magaalada waxa dhex mara doox ay ku soo shubmaan biyaha golis oo biyaha ku dara badda. Biyahaasi waxa ay sii qaadaan xaddi aad u badan oo qashinka caagaga ah oo qaarkood si ula kac ah dadku u soo raaciyaan qaarna ay biyuhu ka soo qaadaan marinnadooda, sidaana badda ku gaadha marka hore, marka xigtana biyuhu ay xeelliga ku soo celiyaan.

Waxa muhiim ah in dadka lagu dhiirrigeliyo yaraynta isticmaalka caagagga, metelen, in ay isticmaalaan dhalooyinka biyaha ee birta ka samaysan marka ay safarka geleyaan, iyo in ay ka fogaadaan iibsiga cuntooyinka fudud ee bacaha lagu duuduubo. Xayiraadda soo dejinta bacaha ayaa iyaduna saamayn leh, iyada oo hoos u dhigaysa heerka bacaha isku marmaraya laamaha dhirta. Qaab kale oo lagu yarayn karaana waa in dadka loo qaybiyo weel aan caag ahayn oo ay qashinka ku ridaan, meelaha ay iskugu imanayaan.

Sidoo kale waa in ay jirto qaab habaysan oo qashinka lagu soo gurayo, iyo qaab hagaagsan oo loo qubayo. Boodhadh/Tabbeelayaal aan balaastig ahayn oo arrintaa lagu dhiirrigelinayo iyo ololi nadaafadeed oo dadka lagu barayo in aanay qashinka meel kasta ku daadin ayaa iyana muhiim ah.

**Eeg Bogga 5aad**

# Saylac iyo Tokhoshi

Axmed Ibraahim Cawaale

Magaalo xeebeedda taariikhiga ah ee Saylac waxa ay ku taallaa Waqooyi-galbeed Soomaalilaan waxa ay u dhawdahay xadka Jabuuti. Waxa ay ku taallaa Gubanka. Dhirteeda waxa ugu badan geed-gaabka iyo cawska sida noocyada *Xudhuunka, Dungaare iyo Darif,* dhir dhaadheerna ma laha.

Saylac waa magaalo qadiimi ah waxana wax ka qoray dhul mareenno badan, oo uu ka mid yahay ganacsadihii Giriigga ahaa ee qoray *The Periplus of the Erythrean Sea* badhtamaha qarnigii koowaad ee miilaadiga. Dhulmareen kale oo caan ahaa, Ibnu batuuta, oo ahaa Muslin Berberiyiinta Markooko ah ayaa isaguna soo booqday 1331-kii.

Helitaanka biyo cabitaanka ku habboon ayaa weligeed caqabad ku ahayd reer Saylac. Richard Burton ayaa markii uu ku sii socday magaalo-qalcadeeddii Herer 1855-kii, wuxu qoray:

*Dhibaatadooda ugu weyni waa helitaanka biyo nadiif ah; ceelku wuxu ka durugsan yahay masaafo ku dhaw afar mayl, xorfadaha ku dhex yaal magaaladuna ma laha wax aan ahayn biyo dhanaan ama qadhaadh oo ku habboon keliya isticmaalka dibadda. Waa sababta macquulka ah ee aan khudaarta looga aqoon, ama aan loogu arkayn faras, baqal iyo xitaa ey.*

Maadaama ceelasha Tokhoshi ay badanka ahaayeen nolosha Saylac, badhasaabkii Masar ee magaalada ayaa masuul ka ahaa ceelashaas iyo in biyahaas hargo lagu keeno Saylac, sida uu sharaxayo Walsh, maamulihii ingiriiska ee Soomaalilaan 1884-1932. Imika ceel riig ah ayaa laga qoday dooxa Tokhoshi kaas oo waraabiya magaalada Saylac.

Tokhoshi waxa kale oo ay caan ku tahay farsamada milixda. Goobaha u dhaw magaalada waxa laga qoday kumannaan hog oo gaagaaban oo la siman joogga badda. Isku dheellitirnaanta biyaha hoosta ka soo galaya iyo uumi baxa ayaa samaynaya xabuub milix ah oo ay cunto kariyeyaashu cuntada ku daraan si ay dhadhan ugu yeelaan, xoolo raacadatuna xoolahooda siiyaan.

Maadaama dhulkaasi uu badda ka sarreeyo 1 m oo qudha, saamayntii duufaantii Sagar ee hawlaha milixdu aad bay u darnayd, taas oo khatar gelisay ishii dhaqaale ee keligeed u ahayd boqollaal qoys.

Muuqaal muhiim ah oo laga helo agagaarka Tokhoshi waa geedka 'Bahaash-ka' Soomaalidu u taqaan (*Hyphaene thebatica*). Midhihiisa waxa loo isticmaali jiray cunto ahaan iyo caleentiisa in laga sameeyo dermooyinka/cawaha, salladaha, xadhkaha iyo saqafka guryaha. Nasiib darro haddeer tiradoodu hoos bay u dhacday. Dhirtii kale ee goobtan lagu yaqaannay mar horeba way dabar go'een. Waxa ka mid ahaan jiray *Dhuur-ta (Tamarix aphylla*), oo ahaan jirtay mid aad ugu badan togga Tokhoshi, sidoo kale *Xinnaha (Lawsonia inermis),* oo ahaa geed uu Burton xusay in uu toggaas ka bixi jiray.

Horumarinta helitaanka biyo la cabbo ee Saylac nolosha dadka oo qudha ma fududaynayso ee sidoo kale waxay ka dhigaysaa deegaan dhirta lagu beeri karo. Dhawaan



Suaeda aegyptiaca oo ku taal Saylac iyo xabaal hore oo ka muuqata gadaal

Sawirka: Axmed Cawaale

hay'adda Candlelight (candlelightsom.org) ayaa Saylac u qaybisay 250 geed oo Dhamas ah *(Conocarpus lancifolius)* si ay cagaarka magaalada uga qayb noqoto.

**Eeg Bogga 10aad**




# Dib-u-habayntii Degelka Ururka

Mary Barkworth

Muuqaallada ku cusub waxa ka mid ah qaybta 'raadinta'. Guji calaamadda qaybtaa oo ku qor erey ama weedh aad wax ku baadhayso. Boggu wuxu kuu soo saari doonaa taxa bogag ama warside uu ereygaas/weedhaas ku dhex jiro. Qaybtaas baadhista iyo muuqaallo kale oo cusub ayaa sahli doona helitaankii xogta degelka. Cali (Injineerka dib-u-habaynta sameeyey) ayaa horumariyey qaybtaas baadhitaanka/raadinta khuseysa isaga oo ku soo daray agabka arrintaa fududeynaya.

Qaybta "What we do" waxa ku jira sharaxaad kooban oo ku saabsan hawlaha haatan ururku ku gudo jiro iyo kuwa la rajaynayo in lagu soo daro. Xilligan yoolku waa diyaarinta macluumaad la xidhiidha kaladuwanaanta noolaha Laas Geel iyo diyaarinta agab waxbarasho loo isticmaali karo sida casharro lagu baran karo kooraska barashada abla'ablaynta dhirta ee Faysal ka bixin doono Jaamacadda Hargeysa. Qayb kasta oo casharradaas ahi waxa ay yeelan doontaa nuxur barasho, tixraac la heli karo, iyo hawl qabad ku lammaan. Metelen waxa ay sida ugu macquulsan u qaadan doonaan dhirta Soomaalilaand.

Qaybta "For you" waxa ku jira link-yo lala degi karo, sharaxaad ku saabsan boggaga internetka ee la adeegsaday in lagu wadaago macluumaadka, iyo tixraacyo la xidhiidha taariikhda iyo kala duwanaanta noolaha Soomaalilaan. Waxa aanu u mahadcelinaynaa Axmed iyo Tomas Mazuch, oo labadooduba soo ururiyey maqaallada iyo buugta degelka ku jira. Qayb ka mid ah tixraacyada lalama degi karo/lama dhawnloodhgarayn karo, laakiin in aad ogaato in ay xogtaasi jirto ayaa ah tallaabada koowaad ee xog lagu raadin karo.

Cali ayaa sidoo kale ku soo daray kayd-macluumaad oo kale, oo la xidhiidha qaybta "News" ee bayjka. Waxa lagu soo bandhigi doonaa hadba noocyada cusub ee noolayaasha Soomaalilaan, sida Panurinus awalei. Sidoo kale nooleyaal hore dunida loogu ogaa laakiin Soomaalilaan imika uun lagu arkay. Macluumaadkaasi waxa ay caawin doonaan in la diyaariyo warbixinta sannadlaha ah oo xiise u yeeli doonta xogaha ku saabsan dhirta iyo xayawaanka Soomaalilaan, taas oo ah qayb ka mid ah waxa ururkan loo aasaasay.

**Eeg Bogga 5aad**

# Dib-u-habayntii Degelka….

(ka yimid bogga 4aad)

Way adag tahay in la ilaaliyo noole aanad ogayn in uu jiro.

Macluumaadka ayaa si tartiib tartiib ah u kori doona laakiin marka foomamka onlaynka ah ee gelitaanka xogta la dhammeeyo, waxaan raadin doonnaa caawimaad ku saabsan horumarintooda. Halkaa, waxa la hawl gelin doonaa badhanka "login", laakiin kaliya kuwa loo oggol yahay in ay xogta gelin karaan ayaa awood u yeelanaya inay galaan. Inta kale xogta waxa ay ku soo gudbin karaan iyaga oo isticmaalaya bogga "Contact us" ama "Nala soo xidhiidh".

Is beddelka xiga ee degelku wuxu ka jawaabi doonaa baahida in la sameeyo kooras la xidhiidha 'Plant Taxonomy' ama 'abla'abalynta dhirta'. Si taas loo gaadho waxa loo baahan yahay in degelka la sii horumariyo.

# Dikhawga …………………

(ka yimid bogga 2aad)

Inta badan dadka Soomaalilaan waxay daadiyaan caagado qashin ah oo aad uga yar marka loo barbardhigo dunida kale, laakiin jiritaan la'aanta habab qashin gur oo hagaagsan waxa ay keenaysaa in qashinkii lagu arko dhirta hoostooda, xeelliga badaha, iyo biyaha badda.

Markaa waxa aynu u baahannahay in aynu diiradda saarno qaabab qashin gur, innaga oo qof ahaan habdhaqankeenna ka bilaabayna laakiin ku baahinayna dedaalladaas meelaha ay dadku iskugu yimaaddaan.



# Karaamayntii Axmed ……

(ka yimid bogga 1aad)

Axmed wuxu bud-dhig u ahaa aasaaskii ururka Somaliland Biodiversity Foundation. Wuxu ka caawiyey Soomaalilaan sidii ay ugu muuqan lahayd dal laga daneeyo cilmibaadhista sayniska ah iyo sidii da'yarta dalka loogu samayn lahaa agab waxbarasho. Wuxu muujiyey astaamo isku dhafan oo muhiim ah oo iskugu jira hoggaamin, aqoon-jacayl iyo xiise hawsha la xidhiidha.



*Pandurinus awalei* Sawirka : F. Kovařík

1Kovařík, F., Lowe, G., & Elmi, H. S. 2020. Dibqallooca Geeska Afrika (Arachnida: Scorpi-ones). Part XXV. Sifaynta *Pandinurus awalei* sp. n. iyo nooca labka ee *Pandiborellius somalilandus* (Kovařík, 2012), oo ay weheliyeen faallooyin ku saabsan magacyada

# Hawl qabadyadii ugu mudnaa ee 2020

Faysal Jaamac Geele

**Dhiroon Ururin**

Sida looga bartay xarumaha kala duwanaanshaha noolaha, xaruntan jaamacaddu waxa ay sannadkii 2020 muhiimadda koowaad siisay soo ururinta iyo daraasaynta dhir badan. Jeenaweri sannadkii hore Axmed I Cawaale, Helen Pickering iyo Anigu waxa aanu safar ugu baxnay Laasgeel. Ujeeddadu waxa ay ahayd in la sii kordhiyo aqoonta dhirta kala geddisan ee goobta iyo in aanu Helen uga faa'idaysanno diyaarinta muuqaallo gaar u ah dhirta goobta.



*Jasiirada Sacaadadiin* *Sawirka: Axmed Cawaale*

Laasgeel ka dib waxa aanu socdaal kale ugu baxnay dhanka Galbeedka Soomaalilaan illaa laga gaadhayey magaalada taariikhiga ah ee Saylac iyo jasiiradda u dhaw ee Sacaadaddiin oo 16 km u jirta xeebta. Juquraafi ahaan masaafada u dhaxaysa Hargeysa iyo Saylac waa mid aad u xiiso leh. Marka laga dhaqaaqo Oogada ee loo daadego dhul hoosaadka Guban qofku wuxu dareemi karaa isbeddelada dhireed. Waxa aanu ka sii gudbnay deegaanka Agabar oo uu geedka *Garanwaagu (Prosopis juliflora)* aad ula wareegay. Marka laga reebo sakaarada (*Madoqua sp.*) oo deegaankaas oo idil caan ka ah waxa kale oo aanu aragnay raxan Garannuug ah *(Gazella walleri).* Intii aan xeebta la gaadhin waxa aanu hakannay dhawr goor si aanu u ururinno muunado dhireed oo la dhigo xarunta kala duwanaanshaha noolaha jaamacadda Hargeysa. Muunadaha dhirta aanu agagaarkaas ka qaadnay waxa ka mid ahaa: *Garas (Dobera glabra), Lebi (Delonix regia), Dibaw (Euphorbia godana)* iqk.

Dhirta dhanka xeebta xigta waxa ugu badnaa Kulan (*Balanites rotundifolia*), *Maygaag (Boscia minimifolia), Quud (Balanites aegyptiaca), Moroh (Leptadenia pyrotechnica*), *Darif* (Cenchrus divisus) iyo *Dungaare (Panicum turgidum).* Dhirta agagaarka Saylac waxa ugu mudan kuwa cusbada adkaysiga u leh sida *Xudhuunka (Suaeda monoica* [inta badan loo yaqaannay *Suaeda fruticose*, berigii hore]

Jasiiradda Sacaadaddiin iyada lama deggena laakiin waxa booqda kalluumaysatada yaryar. Cawska iyo geedgaabka ka baxa kama duwana kuwa bananka kale ka baxa, marka laga reebo dhirta ku teedsan ee dhanka mawjadda xiga oo u badan geedka *Takhayga (Avicennia marina) iyo Qandalka (Bruguiera gymnorrhiza).*

Muunad ururin intii ka badan waxa aanu samaynay socdaalkii ku laabashada Hargeysa, oo dhanka Boorama la soo maray. Laba geed oo muhiim ah oo aanu soo qaadnay ayaa kala ahaa geedka *Canjeelka* (*Mimusops angel) iyo Moolliga (Dracaena schizantha).* Hore geedka Canjeelka waxa loogu diiwaangeliyey in uu ku eeg yahay gobol dhiroonka N3 (Waqooyi-Bari Soomaaliya). Imika se waxa uu ka mid noqonayaa muunadaha dhirta Soomaalilaand lagu og yahay.



*Dracaena ombet* Sawirka: Axmed Cawaale

# Hawl qabadyadii ….

**(ka yimid bogga 6aad)**

Moolligu wuxu ku jiraa dhirta khatarta ugu jira in ay dabargo'aan sidaa darteed dhawr caleemood ayuun baanu ka soo qaadnay muunad ahaan, si joogitaankiisa loo diiwaangeliyo iyada oo aan halis la gelinayn badbaadadiisa.

Bishii Sibtambar Axmed iyo anigu waxa aanu socdaal kale ugu baxnay dhanka Marso oo ah galbeedka Sheekh. Waxa aanu ka galnay dhanka Gacanlibaax annaga oo sii marnay god-taariikheedka Garbo Kaynle ee Gacan Libaax u dhaw, Iskudar, Halo, kaddibna u gudbnay dawga Qoldhob oo ah marinka qudha ee baabuurtu u mari karaan Kalwaraabe iyo ugu danbayn Kulmiye. Muunadaha aanu meelahaa ka ururinnay waxa ka mid ahaa Dacarta *Aloe jucunda*, sidoo kale Axmed ayaa rajaynayey in uu helo geedka *Baar (Cyanotis somaliensis)* oo markii ugu horreysey deegaankan laga qaaday 1895-kii. Deegaanka wax is beddel ah kuma dhicin illaa markii la ururiyey laakiin haddana kuma aanu guulaysan in geedkaas helno. Taasi kama dhigna in aan geedku meesha ku oollin, laakiin keliya xilligii koobnaa ee aanu goobta ku sugnayn kuma aanu guulaysan in aanu aragno.

God dhagaxeedka Garbo Kayle waa mid xiiso leh, laakiin si ka duwan sida Laas Geel, dadku waxa ay u isticmaali jireen hoy ahaan, qiiqii dabka ee ay ku shidan jireen ayaa qariyey summadihii. Buugga '*Prehistoric Paintings in British Somaliland*' ee ay qoreen M. Burkitt & P.E. Glover (1946), ayaa muujinaya dabagal ay sawirrada ku sameeyeen Glover iyo xaaskiisu. Waxa ay soo bandhigeen sawirro dadeed, kuwo mulac, libaax iyo xayawaanno kale oo geeso loo sameeyey. Qaar ka mid ah sawirrada maqaalkaas lagu soo bandhigay waxa ka mid ah geedka berdaha ah ee godka hortiisa ku yaallay 1946-kii markii sawirka la qaaday oo aanu ku faraxsannahay in aanu aragnay isaga oo weli bartii ku yaalla xilliga aanu booqannay.

Ceelka Halo markii aanu maraynay waxa aanu ku guulaysannay in aanu ururinno muunado dhireed oo aanaan hore u qaadin. Waxa ka mid ahaa *Ruqumbaa (Pavetta venenata), Qulcis (Ficus palmata), iyo Alaalo (Saccharum ravennae).* Goobtu waxa ay caan ku tahay durdurka aan kala go'a lahayn waxana iman jiray xoolo raacatada u soo aroori jiray iyaga iyo xoolahooduba. Beryahan danbe se aad looma yimaaddo maadaama berkedo badan iyo balliyo laga qoday dhulkii biyaha yaraa ee koonfurta buuralayda Golis.

Jidka la marayey ha adkaado oo cidhiidhi ha noqdo laakiin muuqaalku dhulkaas ayaa xiiso lahaa oo soo bandhigayey quruxda kala duwanaanshaha noocyada dhirtiisa, oo ay ugu badnaayeen saddexda geed*: Dayib (Juniperus procera), Dhosoq (Buxus hildebrandtii), iyo Xayramad (Dodonaea viscosa).* Muuqaalkaas guud baa ruuxdayadii daali lahayd gelinayey tamar cusub oo ay hawlaha ku sii wadi karto.

Jarka buurta oo waxyar xaga waqooyi ka xiga tuulada kulmiye ayaa isaguna marka la kor istaago bixinayey muuqaal duleed oo cajiib ah. Waxa aanu halacsanaynay hummaagga dekedda Berbera oo hilaaddii 40 km goobta u jirtay. Jarkaas waxa aanu ka qaadnay muunado, sida: *Baar Biyood (Commelina petersii), Weger (Olea europaea subsp. Africana) Adaadi (Tarchonanthus camphoratus)* iyo dhawr kale.



*Anacampseros* Sawirka: Axmed Cawaale

Isla bishaas Sibtember Axmed iyo anigu waxa aanu socdaal kale ku tagnay dawga Jarrato oo ku yaalla jidka u dhaxeeya Cadaadley iyo Mandheera. Ujeeddada socdaalku waxa ay ahayd in macluumaad dheeraad ah laga helo geedka Anacampseros *L.*, oo uu Axmed halkaa hore ugu arkay socdaal kan ka horreeyey.

# Hawl qabadyadii ….

(ka yimid bogga 7aad)

Muunad aanu geedkaas ka soo qaadnay ayaanu ku beernay beerta xarunta kala duwanaanshaha si loo darso in uu nooc cusub yahay iyo in uu la nooc yahay jaadkii hore ee *A. vespertine,* oo hore loogu diiwaan geliyey laba goobood oo kala ah meel u dhaw Dacar-Budhuq iyo meesha kale oo ah waqooyi-bari Soomaaliya.

Socdaal hawleedyadaas waxa lagu soo ururiyey xogta muunado dhireed oo gaadhaya toddobaatan iyo afar (74) muunadood. Tiradaas marka lagu daro muunadaha kale ee uu Axmed sida gaarka ah xarunta ugu soo kordhiyey tiradu waa ay ka sii badnaanaysaa intaa oo waxa ay ku



Balaadhinta beerta SBF

Sawirka: Faysal Jaamac

dhawaanaysaa 100 muunadood. Sidoo kale beerta xarunta ayaa iyaduna tiro toban (10) geed ahi ay ku soo biireen. Arrinta muhiimka ah waa in socdaalladaasi wax badan iga bareen kala duwanaanta dhirta Soomaalilaan, waxana aanu rajaynaynaa in aanu aqoontaas baahinno.

**Wararka kale ee xarunta**

**Ballaadhinta xayndaabkii beerta**

Xayndaabkii xarunta oo intii hore laga kordhiyey. Tani waxay sahlaysaa in barxadda dhir intii hore ka badan lagu beeri karo si loo daryeelo; isla markaana lagu korjoogtayn karo korriinkooda. **(Sawir)**

**Booqashadii Xarunta Daraasaadka Dhiroon-daweedka Jabuuti.**

Dr. Faadumo Cabdul-ladiif, agaasimaha xarunta




Bandhig Carweed — Sawirka: Faysal Jaamac

cilmibaadhsita iyo daraasaadka dhirta dawada ah ee Jabuuti ayaa SBF ku casuuntay shir Jabuuti labo cisho ka soconayey oo lagaga hadlayey "Daraasaadka iyo cilmidhaadhista dhirta dawada ah" Doodo, tabbeelooyin, iyo daraasado la xidhiidha mawduuca ayaa lagu soo bandhigay xaruntii shirka ee 'Aqalka Ummadda'. SBF waxa ay soo bandhigeen mawduuc ciwaankiisu yahay "Diiwaangelinta Kala'duwanaanshaha Noolaha Laasgeel -



Dr. Fatouma Abdul-latif iyo Faysal Jaamac oo buug kala qaadanaaya

Soomaalilaan". **(Sawir).**

Markii shirku dhamaaday waxa aan booqday xarunta cilmi baadhista iyo daraasadaynta dhirta dawada ah ee Jabuuti, aniga oo agaasimaha xaruntaas Dr. Faadumo Cabdulladiif, guddoonsiiyey buugga "Introduction to Plants in Central Somaliland", ee ay qoreen Helen Pickering iyo Axmed Cawaale; dhankeedana ka guddoomay buug ay

# Hawl qabadyadii ….

(ka yimid bogga 8aad)

qortay oo la yidhaa “Plantes médicinales de la République de Djibouti’, oo ay u hadyeysay xarunta kala’duwanaanshaha noolaha Soomaalilaan. Maadaama dhirta labada dal aad iskugu mid u yihiin waxa aanu rajaynaynaa in aanu xoojinno wadashaqaynta labada xarumood, gaar ahaan dhinaca daryeelka noolaha kala duwan **(Sawir).**




**Fidinta Xidhiidhada Xarumaha Dhiroonka**

Xagaagii 2020, Mary iyo anigu waxa aanu la xidhiidhnay Dr. Kordofani Maha (Jaamacadda Kharduum), Dr. Faadumo Maxamed (Xarunta Dhiroonka Qaran ee Jabuuti), Dr. Sileshi Nemomissa (Xarunta Dhiroonka Qaran ee Itoobiya), Cabdi-Naasir Aways (Xarunta Dhiroonka Gobolka Ismaamulka Soomaalida Itoobiya), Dr. Mutuku Musili (Carwada Qaran ee Kiiniya), iyo Dr. Patrick Mutiso (Jaamacadda Nayroobi) annaga oo ku martiqaadnay in ay ku soo biiraan degelka OpenHerbarium si loo hagaajiyo wadaagga muunadaha dhireed ee gobolka Waqooyi-Bari Afrika. Dhamaantood way soo dhaweeyeen. Inta badan xarumahaasi mar hore ayey bilaabeen in ay xogta muunadaha koombiyuutar ku kaydiyaan, laakiin illaa hadda ma ay baahin. Dhamaantood way soo dhaweeyeen in baahinta xogtu ay u fiican tahay maadaama sawir waadax ah ay ka bixin doonto filiqsanaanta dhirta waqooyi -bari Afrika. Sannadkan 2021 waxa aanu sidoo kale rabnaa in aanu xidhiidhada ku soo darno xarun dhiroon oo Masar ku taalla.

Wax badan hore uma aanu socon xannibaadaha ‘COVID19’ awgeed, maadaama dadka badankiisu ay guryaha ku dhex shaqaynayeen, culayska internet-kuna iska jiray. Waxa aanu isku daynay in aanu xidhiidhka u beddelno dhanka telefannada, laakiin iyada qudheedu ma sahlanayn. Maadaama aanay booqan karin xarumahoodii way adag tahay in ay xogta dhiroonku noqoto mid la wadaago, Sidaa darteed way adag tahay in la gudo galo wadashaqayntii xarumaha u dhaxayn lahayd iyo in laga faa’idaysto fursadaha maalgelineed ee barnaamijkaas.

Gugan baanu dib u cusboonaysiin doonnaa dedaalladaas. Yoolka koowaad wuxu noqon doonaa in aanu taageero u raadinno aqoon-is-weydaarsi ka qabsooma Hargeisa, taas oo saamixi karta in ka soo qaybgalayaashu ay wax ka fahmaan isticmaalka OpenHerbarium iyo in ay qudhoodu is bartaan.

Helen Pickering iyo Mary ayaa iyaguna degelka OpenHerbairum qaybta “Flora projects” ku diyaariyey liis ay ka diyaariyeen dhirta Suudaan iyo Koonfurta Suudaan, ee uu qoray Darbyshire et al. (2015) in *The Plants of Sudan and South Sudan: an annotated.*

Sidoo kale waxa ay liis kale ka diyaariyeen dhirta dawada ah ee Jabuuti oo ay ka soo dheegteen buugga *Plantes médicinales de la République de Djibouti* by M.Abdoul-latif et al. (2018).

**Naaslayda Soomaalilaan: Diiwaan Cusub**



*Ammodorcas clarkei*

Sawir gacmeed: Joseph Smit

Dabayaaqadii 2020, T. Mazuch, A. Barre, iyo A. Awale ayaa soo saaray diiwaan ku saabsan naaslayda laga helo berriga Soomaalilaan. Diiwaanku wuxu ku fadhiyaa ilo xogeedyo dhawr ah waana noocii u horreeyey ee muddo badan ka dib dib u habeeya xogta liiskaas. Mary ayaa liiska ku daabacday

# Hawl qabadyadii ….

(ka yimid bogga 9aad)

OpenZooMuseum (Eeg qaybta ay ku qoran tahay “Flora Checklists”). Waxa ay ku kordhisay dhawr nooc oo ay inta badan ka dul boodaan diiwaannadu oo ah dadka iyo xoolaha la dhaqdo. In la illaabo noocyadaasi waa iyada oo la illaabay nooca noole ee ugu tirada badan Soomaalilaan.

Gugan, Faysal iyo Axmed ayaa u soo bandhigi doona arday ka tirsan jaamacadda Hargeysa in ay naaxiyaan xogta diiwaanka, si ay u sii raaciyaan sawirro iyo muunado kale oo lagu daabaco OpenZooMuseum.

In liiska xayawaannadaas lagu ladho sawirro waxa ay sahlaysaa in diiwaanku uu si fiican uga qayb noqon karo waxbarista ardayda; sidoo kale waxa ay fahan fiican ka bixin kartaa in la ogaado meelaha kala duwan ee ay xayawaannadu kaga nool yihiin Soomaalilaan. In hawshaas ardayda laga qayb geliyo waxa ay ardayda ka caawin kartaa in ay bartaan qaabka loo diyaariyo macluumaad waari kara oo la xidhiidha kala




Bandhig Carweed Sawirka: Faysal Jaamac

# Saylac iyo Tokhoshi……….

(ka yimid bogga 3aad)

Hay’addu waxa ay ku hawlan tahay samaynta xarun dhirta lagu tarmiyo loona adeegsado hadh ahaan iyo qurux ahaan sida *maacaleeshka* (*Delonix regina) iyo bogonfiiliyaha (Bougainvillea),* iyo in la fidiyo xuduudka/baaxadda dhirta Takhayga ah.

Dhawaan dawladda hoose ee Saylac iyo xafiiska gobolka ee wasaaradda Deegaanku, ayaa iska kaashaday kor u qaadista ololaha dhir beerista iyaga oo keenay dhir badan oo magaalada lagu beeray.



Suaeda aegyptiaca oo ku taal Saylac iyo xabaal hore oo ka muuqata gadaal

Sawirka: Axmed Cawaale

Burton, R.F. 1856. First footsteps in East Africa. Tylston and Edwards.

Walsh, L.P. 1932. Under the Flag: And Somali Coast Stories. Melrose Publishers.

**Nagala Soo Xidhiidh**

Somaliland Biodiversity Foundation Website: www.somalilandbiodiversity.org

E-mail: aiawaleh@gmail. com; Attn.: Ahmed Awale

Goobta xafiiska: Gudaha Jaamacadda Hargeysa

Cinwaanka dibedda: Somaliland Biodiversity Foundation 397 Lauralin Drive, Logan, UT 84321, USA

Email: mary.barkworth@gmail.com

The Somaliland Biodiversity Foundation is registered as a 501 © (3) organization in the United States